GMDQ
Guddiga Madaxa-bannaan
ee Doorashooyinka Qaranka

# Hadal-jeedinta Guddoomiyaha Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka

## Barlamaanka JFS

Mrw. Halima Ismail Ibrahim

Juun 27, 2020

*Guddoomiyaha Golaha Shacabka*
*Mudane; Mohamed Mursal Sh. Abdirahman,*
*Guddoomiye K/Xigeennada;*
*Mudanayaasha Sharafta leh ee Barlamaanka;*

Waxaa maanta sharaf ii ah inaan hor imaado anigoo ku hadlaya magaca GMDQ, gudanayana waajibaadka sharacigu na farayo ee ah inaan warbixin siino Baarlamanka JFS.

Run ahaantii waa fursad taariikhi ah in diiwaan hayaha taariikhdu qoridoono in ka badan 50 sano ka dib, ay dalka Soomaaliya ka qabsoonto doorasho qof iyo cod ah taas oo ay ku baratamayaan xisbiyo siyaasadeed oo leh murashixiin rag iyo haween ah si ay ugu tartamaan kuraasta Baarlamaanka. Sidoo kale, waxaa maanta shacabka Soomaaliyeed rag iyo dumarba fursad u heli doonaan 50 sano ka dib, inay u dareeraan goobaha codbixinta si ay si xor ah codkooda u dhiibtaan una doortaan xildhibaanka ay rabaan inuu ku matalo Baarlamaanka soo socda, taas oo ah xuquuq dastuuri ah oo muwaadin kasta xaq u leeyahay. Waxaa hubaal ah inaad tihiin barlamaanka ugu horreeyey ee u dhaqaaqay soo saaridda sharciga doorashooyinka laga soo billaabo barlamaankii Carta oo ay maanta 20 sano ka soo wareegtay.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

GMDQ waa hay'ad Dastuuri ah, u dhexeysa dhamaan daneeyasha doorashooyinka, aan ahayn hay'ad sharci dejin ah, sida ku cad dastuurka ku meel gaarka ah qodobkiisa 111G iyo sharciga lagu dhisay oo qeexaya

waajibaadka Guddiga oo ah inuu diyaariyo, maamulo lana socdo doorashooyinka Baarlamaanka Federaalka.

Qodobka 13aad ee Sharciga Doorashooyinka iyo qodobka 60aad ee dastuurka waxay waajibinayaan in doorashooyinka heer qaran la qabto afartii sanaba hal mar bil ka hor dhammaadka mudda xileedka baarlamaanka.

Sidoo kale, Qodobka 53aad ee sharciga doorashooyinku wuxuu ku waajibinayaa GMDQ in uu labada gole baarlamanka Federaalka Soomaaliya oo wadajira uu horkeeno jadwalka, xogta iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qabsoomida doorashada isaga oo cayimaya wakhtiga doorashooyinka lix bilood ka hor maalinta doorashada.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Shantii sano ee u dambeysay Guddiga Madaxa Bannaan ee Doorashooyinka Qaranku wuxuu ku guda jiray u diyaar garawga doorashooyin guud oo qof iyo cod ah. Wuxuu ku guulaystay dhismaha awoodda hay'adda Guddiga, kor u qaadidda aqoonta hawlwadeennadiisa, diyaarinta qabyo qoraalka xeer-nidaamyaasha muhiimka u ah hirgelinta doorashada, diyaarinta manhajka wacyigalinta codbixiyaha, diiwangalinta ku meelgaarka ah ee xisbiyada siyaasadda iyo diyaarinta qorsheyaasha farsamo ee hanaanka doorashada.

Waxaa Guddiga ku guulaystay in uu xafiisyo ka furo inta badan gobollada dalka. Ujeedooyinka ugu waawayn ee xafiisyadan ayaa ahaa in Guddigu gaarsiiyo dadwaynaha Soomaaliyeed howlaha doorashooyinka isla mar ahaantaana uu dalka ka sameeyo tirakoob goobaha noqon kara xarumo diiwaangelin iyo codbixin uuna xog ururin ka sameeyo gobollada dalka.

Wuxuu Guddigu soo asteeyey inta badan goobaha dalka ee noqon kara goobo codbixin iyo diiwaangelin.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Diyaar garawgan farsamo ee Guddiga waxaa barbar socday dadaal dheer oo uu ugu jiray helitaanka saldhig sharci oo hagaya howlaha doorashada iyo habraacyo dhamaystiran oo loo maro howlaha doorashada.

Inkasta oo Guddiga horumar ka sameeyey u diyaar garowga howlaha doorashooyinka, waxaa hubaal ah inay dhiman yihiin howlo waawayn oo la xiriira doorashooyinka

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Waxaa xusid mudan in Guddigu laga soo bilaabo kalfadhigii 1aad ee barlamaanka 10aad Sannadka 2017 ilaa kalfadhigii 6aad sannadka 2020 uu la wadaagayey xildhibaannada sharafta leh warbixinnada iyo waxyaabaha lagama maarmaanka u ah qabsoomida doorashada.

Waxaad xasuusan tihiin in sharciga doorashooyinka lagu wadey in la ansixiyo sanadkii 2018, sida uu tilmaamayay qorshaha xukuumadda ee tubta siyaasadda loo dhan yahay hase yeeshee wuxuu soo gaaray dhamaystirkiisu maanta oo aan baralamaanka horjoogno.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Daahidda shuruucda doorashada waxaa weheliyay caqabado soo wajahay Guddiga oo kala ah kuwa Soomaalidu isku dhex abuurtay iyo kuwa dabiici ah sida ismaandhaafka siyaasadeed, nabad galyo la’aanta, fatahaadaha, iyo dhibaatada caafimaad daro ee ka dhalatay cudurka safmarka ah ee COVID19

kuwaas oo dhamaantood xagal daaciyay jadwalka shaqo ee Guddiga iyo geeddi socodka howlaha doorashada.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Inkasta oo ay jiraan duruufahaas adag, haddana Guddigu wuxuu sii waday dadaalka uu ugu jiro dhamaystirka geeddi socodka howlaha doorashada ka dhiman oo ay ugu horrayso diiwaangelinta codbixiyaha.

Guddigu wuxuu u daraasad ku sameeyey shan nooc oo ka mid ah hababka loo diiwaangelin karo codbixiyaasha waafaqsanna halbeegyada caalamiga ah ee doorashooyinka. Waxaan halkan idinku la wadaagaynaa si kooban natiijada daraasadda laba ka mid ah hababka diiwaangelinta kuwaas oo aan u aragnay in lagu hirgelin karo doorashooyinka dalka.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Guddiga waxaa waajib ku ah inuu dhaqan geliyo sharciga doorashooyinka ee uu ansixiyay barlamaanku, madaxwaynuhuna saxiixay kaas oo qeexaya nooca diiwaangelinta ee uu dalku yeelan doono oo ah ku diiwaangelinta codbixiyaha nooca Biometric ah iyo howlaha la xiriira. Noocan diiwaangelin iyo howlaha la xiriira ayaa waxaa ka mid ah:

- In la soo iibiyo qalabka diiwangalinta codbixiyaha oo meel fiican ay marayso shaqadiisu.
- In hay'adaha amniga xaqiijiyaan xarumaha lagu diiwangalin karo codbixiyaha ee la sugi karo amnigooda.
- In la fuliyo wacyigelin balaaran si dadwaynuhu uga qaybgalaan is diiwaangalinta

- In la geeyo qalabka iyo shaqaalaha diiwangalinta xarumaha diiwaangalinta.
- In la diiwaangeliyo codbixiyaasha xaqa u leh codaynta.
- Soo saaridda liiska codbixiyaha ee rasmiga.
- Qaybinta kaarka aqoonsiga codbixiyaha
- Diiwangalinta Rasmiga ah ee Xisbiyada Siyaasadda
- Diiwaangalinta Musharixiinta xildhibaannada.
- Ololaha Doorashada Xisbiyada.
- Qabashada Doorashada (maalinta codbixinta)

Haddaba waxaan ka hor caddaynaynaa Barlamaanka iyo ummada Soomaaliyeed in doorashada ku dhacaysa habka biometric ka ah aysan suurto gal ahayn inay ku qabsoonto waqtigii loogu talagalay ee ahaa Nov 27, 2020 sababaha aan soo sheegnay dartood.

Sidaa darteed, Annaga oo xaqiijinayna nooca doorasho ee sharcigu qeexay, isla markaana tixraacayna howlaha muddaysan ee sharciga ku xusan, Waxaan cadaynaynaa in ay doorashada ku dhacaysa nooca biometricka ah ku qabsoomi karto muddo 13 bilood ah oo ka bilaabmaysa July 2020 kuna eg Aug 2021.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Waxaa hubaal ah in hawlgalka doorasho oo nooca Biometricka ah ee aan soo sheegay ah uu waafaqsanyahay sharciga doorashada dhinaca howlgalka balse uu u baahan yahay waqti dheeri ka ah muddadii sharcigu tilmaamay iyo miisaaniyad baaxad leh.

Annaga oo haddaba tixgelinayna xaaladda dalku ku jiro, wuxuu Guddigu soo bandhigayaa nooc labaad oo lagu magacaaabo diiwaangelinta gacanta ee isla maalinta codbixinta (Sameday manual registration).

Noocan wuxuu ka duwan yahay kan sharcigu xusayo dhanka waqtiga iyo kharashkaba. Waxaana diiwaangelintiisu ku salaysan tahay in aan la isticmaalin biometricka sharcigu xusay, codbixiyaashana waxaa lagu diiwaangelinayaa gacanta isla maalinta codbixinta iyada oo la adeegsanayo diiwaan qoraal ah (Same day manual registration) .

Noocaan gacan ku diiwaangelinta waxaa uu ku qabsoomi karaa muddo 9 bilood oo ka bilaabata July 2020 kuna eg March 2021. Habkani waxaa u ka qarash yar yahay kana waqti gaaban yahay nooca diiwaan gelin ee ku xusan sharciga doorashoyinka.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Labadan hab waxaan idinku soo bandhignay si aad u kala xulataan idinka oo tixgelinaya duruufaha dalka. Waxa lagama maarmaan ah si loo dhaqan galiyo nooc kasta oo aad xulataan in guddigu helo taageerada muhimka u ah fulinta howlaha doorashada. Waxaan maanta idiin soo bandhigi doonaa tilmaamaha labada nooc, faa'iidooyinkooda, dhaliilaha mid walba leeyahay iyo waliba miisaaniyaddooda khudbadda ka dib.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Waxaan adkaynaynaa in GMDQ uu yahay Guddi farsamo oo fuliya shuruucda doorashooyinka kaas oo aan qayb ka ahayn tartanka siyaayasadeed ee dalka ka jira. Guddiga waxaa ka go'an inuu qabto

doorashooyin xor iyo xalaal ah oo lagu kalsoonaan karo kana turjumaya rabitaanka iyo yididiilooyinka shacabka Soomaaliyeed. Annaga oo tixgelinayna xaaladda uu hadda dalku ku jiro, waxaan u diyaar garawnay inaan hirgelino doorasho ku salaysan arrimahan:

- Shuruucda doorashada ee dalka
- Abuurista diiwaan codbixiye oo waara siina jira;
- Xisbiyo siyaasadeed oo rasmi ah, Musharrixiin iyo codbixiyaal diiwaangashan.
- Jawi nabdoon.
- Qiima la awoodi karo.
- Siinaya kalsooni dhamaan daneeyaasha.

Guddigu wuxuu idiin xaqiijinaynaa inaan si aad ah ugu baraarug sannahay culayska waajibaadkeenna dastuuriga ah iyo in masuuliyadda sharci ee nasaaran aysan ku koobnayn isbeddel doorasho ee xubnaha Baarlamaanka hadda jira iyo kuwa mustaqbalka balse ay saamaynayso dhammaan umadda Soomaaliyeed.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Waxan ku faraxsanahay in maanta qayb ka mid ah xisbiyada siyaasadeed ee sida KMG ah u diiwaangashan ay ku dhaqaaqeen tallaabo taariikhi ah iyaga oo soo gudbiyay codsiga diiwaangelinta rasmiga ah kaas oo aan waafajin doono sharciyada doorashooyinka. Waxaan ku dhiiri gelinaynaa xisbiyada kale in ay ku dhaqaaqaan sidii ay uga bixi lahaayeen ku meelgaarnimada.

***Mudane Guddoomiye, Xildhibaannada sharafta leh.***

Ugu dambayntii, Doorashadii dadbanayd ee dalka ka dhacday 2016kii waxaan kulligeen ka barannay casharoo lama ilaawaan ah oo raad culus iyo mahadho uga tagay ummadda Soomaaliyeed inkastoo heshiis siyaasadeed lagu gaaray in aan dib dambe loogu laaban. Taasi waxay Gudigu ku dhiiri gelisay in aysan u hanqal taagin doorasho ka hor imaanaysa shuruucda doorashooyinka u degsan.

Sidaa darteed, Waxaan u baahannahay maanta taageerada DF, Dawladaha xubnaha ka ah Federaalka, beesha caalamka, xisbiyada siyaasadda, warbaahinta, Bulshada rayidka ah, xubnaha baarlamaanka iyo dhammaan dadka Soomaaliyeed inay nagu garab istaagaan ka guul gaaridda geeddi socodka howlaha doorashada.

Waxaan aaminsannahay in maanta la joogo xilligii la isu kaashan lahaa abuuridda hannaan dimuqraadi ah oo siinaya ummada Soomaaliyeed xuquuqdooda dastuuriga ah si ay si xor ah ugu soo doortaan xubnihii u matali lahaa masiirkooda.

*Mahadsanidin*

---

*Guddiga Madaxabannaan ee*
*Doorashooyinka Qaranka*
*Juun, 2020*
*Muqdisho, Soomaaliya*

---

*Aan is Aamino, Aan is Doorano*